Somali

(insert school name) wuxuu maareynayaa baaritaanka Check Yourself ee ardayda sida qeybta koowaad ee barnaamijka Dugsiyada Dadweynaha Seattle SBIRT. Mashruuca ka hortagga SBIRT wuxuu higsanayaa inuu yareeyo isticmaalka maandooriyaha dhalinyarada, kor u qaado caafimaadka maskaxda, iyo inuu ardayda ku xiro ilaha loo baahan yahay si loo najaxo. Ardayda ayaa waliba laga yaabaa inay helaan xog-uruurin dabagal ah inta lagu gudajiro ka-qeybgalka barnaamijka SBIRT.

Kaqeybgalka baaritaanka Check Yourself iyo dabagalka gabi ahaanba waa ikhtiyaari. Qoysasku waxay dooran karaan inay ka joojiyaan ardaygooda, ardayduna sidoo kale way diidi karaan inay kaqaybqaataan. Ma jiraan wax ganaax ah oo ka imanaya inaan laga qaybgalin isla markaana buundooyinka ardaygaaga wax saameyn ah kuma yeelan doonto. Nuqul kamida baarista iyo dabagalka daraasada ayaa laga heli karaa (**insert school name**) qoysaska doonaya inay dib u eegaan. Hadaad jeceshahay inaad hormariso baaraha / sahaminta ama aad ubadkaaga ka joojiso ka qeybqaadashada, fadlan la xiriir (**insert name, email, telephone number**).

Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan SBIRT ama Check Yourself fadlan dib u eeg Su'aalaha Inta badan la Isweydiiyo ee hoose. Haddii aad jeclaan lahayd inaad qof kala hadasho SBIRT, fadlan la xiriir (**insert name, email, telephone number**).

Waa maxay Iska Baarida SBIRT?

Baadhitaanka, Wax ka-qabashada Kooban, iyo U-diritaanka Daaweynta (SBIRT) waxaa loo isticmaalaa in lagu garto, yareeyo, lagana hor tago isticmaalka maandooriyaha iyo kor u qaadista caafimaadka maskaxda. Barnaamijka SBIRT ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa lagu maalgeliyaa barnaamijka 'King's Best Starts' ee carruurta kaasoo maalgeliya istiraatiijiyadaha kor u qaadida caafimaad, carruurta adkeysiga badan, dhalinyarada, qoysaska, iyo bulshada. SBIRT waxay leedahay saddex qaybood oo waaweyn.

- **B**aadhitaanka**:** Ardayda waxay qaadanayaan baaritaan isdhaxgal, oo saaxiibtinimo leh oo bixiya jawaab celin shaqsi ahaaneed oo ku saabsan dabeecadaha caafimaadka. Baadhitaan aamin ah, oo ku saleysan webka ayaa lagu samayn karaa aalad kasta oo elektiroonig ah.
- **W**ax ka qabadka Kooban: Hadii baaristu muujiso baahi, wadahadal gaagaaban oo lala yeesho shaqaalaha SPS ayaa raacaaya kaas oo diirada saaraya awooda iyo waxqabadka ardayga..
- **U** Diritaanka **A**deegyada: Haddii ardaygu u baahan yahay taageero dheeri ah, shaqaalaha SPS waxay u gudbin karaan ardayda / qoysaska adeegyo gaar ah oo ku saleysan baahidooda.

Baaritaanka **Check Yourself**, oo ay soo saartay Isbitaalka Caruurta ee Jaamacadda Washington ee Seattle, waa aalad ku saleysan cilmi baaris ay ardeydu qaadan karaan iyagoo qayb ka ah barnaamijka SBIRT. Dhallinta King County iyo waalidiinta waxay ku hawlanaayeen samaynta aaladdaan, jawaab celintooduna waxay muhiim u ahayd markii la soo uruuriyay shaashad dhammaystiran, dhaqan ahaan jawaab u leh, iyo saaxiibtinimo

dhallinyar. Ujeedada aaladda ayaa ah in la caawiyo wada-hadalada u dhexeeya ardayda iyo kooxda ka taageerta dugsiga ee ku dhiirigelisa ardayda inay sameeyaan xulasho caafimaad leh. Moodeelkan waxaa la cadeeyay inuu ku guuleystey taageerida shaqsiyaadka jooga xarumaha daryeelka aasaasiga ah, rugaha caafimaadka ee iskuulka ku saleysan, iyo waaxaha xaaladaha deg-degga ah.

Waa kuwee dugsiyada Seattle ee ku jira mashruuca?
Dugsiga Dhexe ee Eckstein, Hamilton International Middle School, Jane Addams Middle School, Madison Middle School, Meany Middle School, Whitman Middle School, iyo Seattle World School hadda waxay hirgeliyaan barnaamijka SBIRT. Iyada oo taageero laga helayo Barnaamijka Ka Hortagga iyo Faragelinta ee SPS, toddobadaas dugsi wuxuu bixin doonaa adeegyo SBIRT oo caalami ah mudada maalgelinta BSK SBIRT. Dugsiyada sare ee dheeraadka ah ayaa tijaabin kara barnaamijka SBIRT inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2021-2022.

Ma ikhtiyaar baa Baaritaanka9(Check Yourself)?
Haa! Baaritaanka Check Yourself, iyo dhamaan qaybaha kale ee SBIRT, waa tabarucaad. Shaqaalaha 'SPS' waxay ardayda u soo bandhigaan SBIRT iyo Check Yourself, waxay u sharxayaan dabeecadda iyo sababta baaritaanka, waxayna wayddiinayaan inay diyaar u yihiin ka-qaybgalka. Haduu ardaygu doorto inuu sidaas sameeyo, shaqaalaha SPS markaa waxay siinayaan aaladda baarista isticmaalkooda. Su'aasha koowaad ee baarista ayaa sidoo kale weydiineysa ardayda inay muujiyaan ogolaanshahooda kaqeybgalka. Haddii ay doortaan inaysan oggolaan, markaa baaritaanka ayaa dhammaanaya. Waalidiintu / mas'uuliyiintu waxay sidoo kale ka saari karaan ilmahooda ka-qaybgalka iyaga oo la xiriiraya maamulka iskuulkooda, kooxda la-talinta, ama shaqaalaha loo cayimay SBIRT.

Waa kuwee ardayda qaadanaya Baaritaanka (Check Yourself)?
Baaritaanka Check Yourself waxaa loo maamulaa labadaba caalami ahaan iyo ardayda loo qoondeeyay. Dhamaan toddobada iskuuladeena dhexe ee SBIRT waxay bixiyaan baaritaan guud oo loogu talagalay ardayda u qalanta ee heer fasal gaar ah. Seddexda iskuul ee tijaabada ah waxay baari doonaan kooxo yar oo ardayda ah. Baadhitaanka caalamiga ahi wuxuu iskuuladayada u oggolaadaa inay ogaadaan waxyaabaha welwelka ka soo gaadho, goorta wax looga qaban karo carqalad yar iyo ka hor inta aan arrimaha waaweyn la horumarin. Intaa waxaa sii dheer, ardayda loo qoondeeyay waxaa laga codsanayaa inay qaataan Baaraha Baaraha. Ardayda waxaa loo aqoonsan karaa si shaqsiyeed baaritaanka sababta oo ah is-tixraac, xaadiritaan hoose, ficillo maandooriye, ama ilo kale oo xogta ardayga ah.

Maxaa lagu weydiiya baaritaanka?
Check Yourself waa qalab is-dhexgal ah sidaa darteed tirada iyo nooca su'aalaha waxay u kala duwan yihiin hadba waxa ku qoran jawaabaha ardayga. Badanaa waxaa la weydiiyaa qiyaastii 40 su'aalood, ardayda badidoodna waxay qaadataa illaa 10-15 daqiiq inay ku dhammaystiraan baaritaanka. Su'aalaha la weydiiyo waxay ku saabsan yihiin tirakoobka dadka, xoojinta, taageerooyinka, yoolalka, isticmaalka maandooriyaha, caafimaadka dhimirka, dhaawacyada, iyo badbaadada.

Yaa arki doona natiijada baaritaanka?
Baaritaanka waxaa maamuli doona Khabiirka Kahortaga ee iskuulka ama Lataliyaha iskuulka, natiijooyinka ardayda waxaa dib u eegi kara shaqaalaha SPS sida lataliyayaasha ama kalkaaliyaasha hadii loo baahdo. Ardeydu waxay isticmaalaan aqoonsi wakiilasho ah markii ay qaadanayaan baarista: ma jiro magacyada ardayda ama lambarada ardayda SPS ee lagu geliyo qalabka baaritaanka internetka. Natiijooyinka ayaa bixiya jawaab celin qiimo leh oo gacan ka geysata go'aaminta taageerooyinka ardaygu u baahan karo guul. Haddii la wadaago natiijooyinka shaashadda laga garan karo ee ka baxsan shaqaalaha SPS, markaa oggolaansho qoran oo waalidka / mas'uulka ah oo loo maro Foomka siideynta FERPA ayaa la heli doonaa ka hor shaacinta..

Somali

Sidee waalidiinta iyo wakiilada loogu wargaliyaa Baadhitaanka(Check Yourself) iyo barnaamijka SBIRT?
Dugsi kastaa wuxuu horumariyaa oo fuliyaa qorshihiisa kaqeybgalka waalidka ee ku habboon qaanuunka Guddiga Dugsiga SPS iyo qawaaniinta khuseysa. Hawlaha kaqaybgalka waalidka ee SBIRT waxaa ka mid ah miisaska macluumaadka habeennada manhajka, munaasabadaha waxbarashada waalidiinta, iyo dhajinta boggaga dugsiga iyo shabakadaha SPS. Waalidiintu / wakiiladu waxay waliba helayaan ogeysiis toos ah oo qoraal ah oo kusaabsan barnaamijka bilowga sanad dugsiyeedka taas oo qayb ka ah Xirmooyinka Iskuulka bilowga ah ee ardayda oo dhan. Waalidiintu / mas'uuliyiintu waxay eegi karaan qalabka Hubinta Naftaada markay codsadaan, oo la mid ah nidaamka dib loogu eego su'aalaha Sahaminta Dhallinta Caafimaadka leh. Intaa waxaa sii dheer, waalidiinta / mas'uuliyiinta ayaa la soo ogeysiin doonaa haddii baaritaanka cunuggooda muujiyo heerar sare oo khatar ah.